



Waalidoow – Fadlan la soco sida telefoonka gacanta loogu isticmaali karo iskuulka

Ma ogtahay in:

- Aan la oggolayn oo ay mamnuuc tahay in xisadda waxbarashada aasaasiga ah ee iskuullada hoose-dhexe lagu isticmaalo telefoonka gacanta, tabletiga (kombiyuutar shaashadeedka), kombiyuutarka la qaato, sammaacadaha dhegaha, saacadda telefoonka ah, saacadaha casriga ah (älykello) iyo dhammaan qalabyada kale ee moobaylka ah.
- Iskuulka ayaa go'aan ka gaaraaya sharciyada nidaameed ee ku saabsan isticmaalka qalabka moobaylka ee xilliyada biririfta ama bareegga, marka cuntada la cunaayo, iyo marka meel laga baxaayo oo meel kale loo wareeegaayo, iyo sidoo kale arrinka ku saabsan meesha qalabkaas lagu haynaayo ama la dhigaayo xilliga ay socoto waxbarashada iskuulka
- Xaddidaadda isticmaalka qalabka moobaylka waa mid lagu xaqiijinaayo degganaanshaha ama xasilloonnida shaqada iyo sidii diiradda loo saari lahaa waxbarashada, iyo sidoo kale xoojinta qaab nololeedka isboorti ee carruurta iyo dhallinyarada, iyo xirfadaha dareenka iyo saamayn isku lahaanshaha ama wadaxiriirka.
- Hawlwadeennada barnaamijyada subaxnimada iyo kuwa galabnimada ee ka baxsan iskuulka, iyo sidoo kale qabanqaabiyayaasha naadiyada iyo hiwaayadaha, waxaa ay leeyihiin sharciyo nidaameed u gaar ah oo ku saabsan isticmaalka qalabka.

Isticmaalka qalabka ee xisadda dhexdeeda:

- Macallinka ayaa go'aaminaaya goorta iyo qaabka loo isticmaalaayo qalabka moobaylka ee waxbarashada dhexdeeda, iyo ku tababarashada xirfadaha dhijitaalka ah.
- Xisadda dhexdeeda waxaa ugu horraynta lagu isticmaalayaa qalabka iskuulka.
- Macallinku wuu ka qaadi karaa ardayga qalabka moobaylka, haddii uu aradygu qalabkaas ku qashqashaad gelinaayo dersiga iyo waxbarashada.
- Dugsigu waxaa uu goor hore waalidka kala heshiinayaa arrinka ku saabsan, sida uu ardaygu u isticmaalaayo qalabkiisa u gaarka ah xisadda waxbarashada dhexdeeda.
- Ardaygu wuu isticmaali karaa qalabkiisa u gaarka ah, haddii uu oggolaansho ka haysto macallinka ama maamulaha iskuulka, tusaale ahaan sababo caafimaad awgood, sida daryeelka xanuunka sonkorowga (diabetes).

Sidee ayaad u taageeri kartaa ilmahaaga iyo hawlaha iskuulka?

- Ka qaybqaado dejinta sharciyada nidaamka, kuna dadaal in aad si fican u barato.
- Kala sheekeyso ilmahaaga arrinka ku saabsan isticmaalka qalabka moobaylka.
- U sheeg ilmahaaga in haddii uu xanuunsado inta uu iskuulka joogo, uu macallinka weydiisan karo oggolaanshaha ah in uu isticmaalo telefoonkiisa.
- Xusuusi ilmahaaga in markasta uu wici karo lambarka gurmada degdegga ah (112).
- La xiriiir macallinka haddii ilmahaaga uu u baahan yahay inuu isticmaalo qalabkiisa moobaylka inta uu iskuulka joogo, sababo la xiriira dhanka caafimaadka awgood ama uu u yahay qalab ka caawinaaya waxbarashada.
- Hubi inaad haysato macluumaadka la xiriirka iskuulka, kaasoo haddii aad u baahato aad ilmahaaga kala xiriiri karto inta waxbarashada iskuulku ay socoto.